https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html
Dib-u-celin iyo Wareega 4

Dib-u-celinta P-EBT ga

Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee iyo Waaxda Waxbarashada ee Tennessee waxay dadaal kasta u galayaan si ay u hubin la'haayeen in dhammaan carruurta u qalanta laga soo bilaabo wakhtigii hore/wareegyadii hore (2020-2021) ee P-EBT ga la siiyay manfacyada. **Bisha Maarso 2022, carruurta xaqa u leh ee aan helin kaalmada barnaamijka Wareejinta Manfaca Elegtarooniga ah ee Faafa (P-EBT) ee sannad dugsiyeedka 2020-2021 waxay heli doonaan lacag-bixin manfacyada dib-u-celinta lacagta.** Tan waxa ku jira qoysas kasta oo dakhligoodu cusub yahay inta muddadaas lagu jiray. Qoysaskaas waxaa la siin doonaa manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta iyadoo lagu salaynayo shuruudaha u-qalmitaanka ee bil kasta oo ay u qalmeen. Ilmo kasta oo u qalma wuxuu heli doonaa manfacyada P-EBT ga inta ay ku la'haayeen kaarka EBT.ga. Haddi ubadku haysto kaarka P-EBT ga oo shaqeeya, manfacyada waxaa loogu soo dari doonaa kaarkaas. Haddii kaar P-EBT cusub loo baahan yahay fadlan booqo www.connectebt.com ama wac 1 (888) 997-9444. Haddii ilmuhu aanu hore u helin P-EBT ga, kaar EBT cusub ayaa gurigooda loo soo diri doonaa. Qadarka ama lacagta manfacaha P-EBT ga way kala duwanaan doontaa ilmo kasta oo xaqa u leh.

Guud ahaan, u-qalmitaanka P-EBT ga dib-u-celinta waxay ku xiran tahay:

- Ilmaha u qalma cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga laga bixiyo, oo
- Ilmuhu waa inaanu ka qayb galin waxbarashada fool-ka-foolka ah ilaa wakhti go'an oo lagu tilmaamay wareeg kasta oo P-EBT ga ah. (Hoos ka fiiri faahfaahin gaar ah oo u qalmida wareeg kasta).

Waalidiintu way hubin karaan inta uu u qalmo ilmahooda iyagoo isticmaalaya Xariirka Waalidka (Parental Portal) ee P-EBT **https://tdhs.service-now.com/relief.**

Sidoo kale TDHS waxay bilawday barnaamijka wada sheekaysiga qoraalka ee SMS-ka si ay shaqsiyaadka ay uga caawiso inay maraan nidaamka manfacaha P-EBT ga, oo ayna u helaan warar cusub wakhtiga loogu talagalay iyo xasuusin ah manfacaha P-EBT ga. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan iska diiwaangelinta adeegga farriinta qoraalka booqo P-EBT Parent Portal oo ah https://tdhs.service-now.com/relief.

Markaad booqato Xariirka Waalidka ee P-EBT ga ka dib, haddii aad qabto wax su'aalo ah, wac khadka P-EBT ga oo ah 833-496-0661. Haddii aad u baahan tahay kaarka P-EBT ga oo cusub fadlan booqo www.connectebt.com ama wac 1 (888) 997-9444.

Manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta waxaa lagu soo shubi doonaa bisha Maarso 2022.

Halkan riix si aad u akhrisato su'aalaha markasta la isweydiiyo.

Dhowaan idinku soo Maqan: P-EBT loogu talagalay Sannad Dugsiyeedka 2021-2022

The USDA Food and Nutrition Service (Adeegga Cuntada iyo Nafaqada ee USDA) waxay ansaxiyeen in la sii wado Barnaamijka Wareejinta Manfaca Elegtarooniga (P-EBT) ee sannad dugsiyeedka 2021-2022. Si kastaba ha noqotee, hawlgalka barnaamijka dib ayaa loo eegaa oo ansaxintiisa waxay ku xiran tahay gobolba-gobolka kale.

https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html
Dib-u-celin iyo Wareega 4

Qorshaha Tennessee ee ah soo shubista P-EBT ga ee loogu talagalay sannad dugsiyeedka 2021-2022 waxaa dhawaan ansixiyay waaxda Adeegga Cuntada iyo Nafaqada ee USDA. Tallaabooyin ayaa hadda la wadaa ama socda si loo go'aamiyo carruurta xaqa u leh iyadoo lagu salaynayo u-qalmitaanka ay u leeyihiin inay helaan cunto bilaash ah iyo cunto qiimo jaban iyo maqnaansho cudurdaar leh oo la xiriira cudurka COVID-19 ka hor inta aan la soo saarin manfacyada dabayaaqada xiliga Gu'ga.

U-qalmitaanka P-EBT ga ee 2021-2022

Si loogu qalmo lacagta P-EBT ga ee loogu talagalay Sannad-dugsiyeedka 2021-2022, ilmuhu waa inuu u qalmaa Barnaamija Qadada Dugsiga ee Qaranka oo dugsigu la kulmay in la xiro ama la dhimay saacadaha 5 maalmood oo isku xigta. Carruurta dhigata Barnaamijka Xaq u yeelashada Jaaliyadda, Bixinta 2aad ama 3aad dugsi ayaa sidoo kale dhici karta inay xaq u yeelan karaan.

P-EBT ga loogu talagalay sannad dugsiyeedka 2021-2022 ayaa waxaa heli kara:

Carruurta iskuulka laga ssiyo cuntada bilaash ah ama qiimo jaban mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka, codsiga dakhliga ama caddayn toos ah
- Dhigashada dugsi Bixinta U-qalmitaanka Bulshada,
- Dhigashada dugsi ku shaqeeya sida waafaqsan Xeerka 2aad ama 3aad, ***iyo***
- *dugsigoodu la xiray ama la dhimay saacadaha la dhiganayay 5 maalmood oo xiraan isku xig ah.*

In kasta oo arrimaha aasaasiga ah ee u-qalmitaanka wax sidaas ah iska ma beddelin sidii uu ahaa xilligii Xagaagii P-EBT (2021), heerka maxalliga ah, dugsiyada qaarkood waxa laga yaabaa inay beddeleen hab-raacyada maamul iyo xiritaanka COVID-19. TDHS iyo TDOE waxay si adag uga wada shaqaynayaan sidii ay u go'aamin lahaayeen carruurta u qalanta manfaca iyo sida saxda ah ee loo hubin karo in manfacaha si sax ah loo wada qaybiyo.

Marka tafaasiil dheeraad ah la dhammeeyo tafaasiishaas oo ku saabsan P-EBT ga sannad dugsiyeedka 2021-2022, wax cusub ayaa lagu soo daabici doonaa bogga TDHS P-EBT iyo akoonnada warbaahinta bulshada ee TDHS.

Sida Loo soo Codsado P-EBT ga Sannad Dugsiyeedka 2021-2022: Carruurta u qalantaa si toos ah ayaa loogu diwaangelinayaa P-EBT ga Sannad dugsiyeedka 2021-2022 sida ku cad diiwaannada ay bixiyaan dugsiyada Tennessee. Looma baahna arji.

Ogeysiis Muhiim: Haddii ilmahaagu hore uu u qaatay kaarka EBT ga, fadlan kaarkaaga sii hayso.